



## **Ardayda Dugsiga Ockley waxa ay ku guuleysteen naqshadii ay u sameeyeen sawiradii qoraalka ahaa ee xaflada Dabaaldegga Portland Jazz**

Farshaxanka Edith Crever, oo ah fasalka todobaad ee Dugsiga Dhexe ee Ockley Green, waxa laga shaqaaleysiyyey in ay ka shaqeysa sawirada loo sameynayo Xaflada Jazz Portland ka dib markii ay ku guuleysatay tartankii naqshadaha.

Naqshada Edith waxa laga soo doortay 240 naqshadood oo ahaa kuwii isugu soo hadhay tartankii kama dambeysta ah, kuwaasi oo lagu sameeyey farshaxan albam labo-jibaaran ah oo qiyaastiisu tahay 12-inch korkiisa. Qeybahaasi naqshada ah waxaa lagu soo bandhigay Madxfaka Farshaxanka Portland Febraayo 13keedii iyada oo ay qiimeynayeen 150 garyaqaan oo lagu soo martiqaaday lana weydiisay inay ka soo saaraan shanta naqshadood ee ugu sareeya.

Shaqada farshaxanka ee Edith waxa ay noqotay boostarka ugu xasuusta badan ee loo qeybiyey xubnaha Jazz Portland kuwaasi la kulmay heerka ugu yar ee la soo bandhigay. Dabaaldegga xaflada wuxuu socon doonaa inta u dhaxaysa Febraayo 15 ilaa 25keeda([PDX Jazz Festival](#)).

Qaar kale oo Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa helay aqoonsi abbaalmarin ah, kuwaasi oo ay ka mid yihiin dhammaan afar arday oo dugsiyada sarre lana sharfay( laga bilaabo Franklin iyo Lincoln) , saddex dugsiyada dhexe lagana soo qaataay da Vinci iyo dugsi hoose oo laga soo qaataay Woodlawn. Fiiri shaqooyinka la sharfay ([See the honorable mention works](#))

Shaqada ay qabatay Edith iyo kuwa la sharfay ee la soo qaataay waxa lagu soo bandhigi doonaa bisha aakhirkeeda dukaanka City Target ee ku yaala faras-magaalaha ee cinwaankiisu yahay, 939 SW Morrison St.

Tartanku wuxuu ahaa mid qeyb ka ah barnaamijka Jazz ee iskuulada kaasi oo lagu barayey ardayda ku nool nawaaxiga Portland nooc ka mid ah muusiga Maraykan. Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ka qeybqaatay waxa ay ahaayeen Boise-Eliot/Humboldt, Woodlawn, Ockley Green, Lane, da Vinci, Franklin iyo Lincoln.